

A scenic view of snow-capped mountains and a turquoise lake in Alberta, Canada. The mountains are rugged and covered in patches of snow, with a clear blue sky above. The lake is calm, reflecting the surrounding landscape. The foreground shows a rocky shoreline with some evergreen trees.

# Hagaha Opportunity Alberta

Sanad kasta, dadka ayaa uga yimaada daafaha caalamka Alberta oo ah goobta ay u doortaan inay ka shaqaystaan ayna ku noolaadaan. Alberta waxay leedahay nolol heer sare ah, bulsho kaladuwan oo soo dhawayn leh, dhul qurux badan, diirad la saaraayo kobaca dhaqaalaha iyo abuurista shaqooyinka iyo fursado badan oo ay heli karaan dadka ganacsiyada abuuraya.

**Hel fursadaada**

<https://open.alberta.ca/publications/opportunity-alberta-guide-somali>

**Hagaha Opportunity Alberta** | Shaqaalaha iyo Socdaalka

©2022 Government of Alberta | Waxaa la daabacay: Sibteembar 2022 | ISBN 978-1-4601-5538-7



# Mawduucyada

NOLOSHA KA JIRTA ALBERTA.....	4
SI KU MEEL GAAR AH U SOO BOOQO ALBERTA .....	7
SI RASMI AH U DEG ALBERTA.....	11
KA SHAQEE ALBERTA .....	16
GANACSI KA FURO ALBERTA.....	19
DEEGAAN KA DHIGO ALBERTA.....	21



# NOLOSHA KA JIRTA ALBERTA

Alberta waxaa ka jira dhaqanno iyo bulshooyin kaladuwan, oo mid kasta leeyahay sifadooda u gaarka ah iyo fursadaha shaqada.

# Nolosha ka jirta Alberta

## Ogoow Fursada ka Jirta Alberta

### Maxaan ku doornayaa Alberta?

Alberta ayaa leh dhaqanno iyo bulshooyin kaladuwan kuwaasoo hooy u ah adeegyo badan oo heer caalami ah.

Bulshooyinkeena ayaa qayb ka ah waxyaabaha Alberta ka dhigaaya meel aad ugu wanaagsan nolosha. Alberta waxay leedahay magaalooyin yaryar, oo baadiyaha ku yaala iyo magaalooyin waawayn, sida Calgary iyo Edmonton, oo leh bulsho dhan 1.3 milyan iyo 1 milyan siday u kala horeeyaan. Mid kasta waxay leedahay sifooyin u gaar ah iyo fursado shaqo oo badan.

Inkastoo Alberta yahay gobalka afraad ee ugu dadka badan Canada, haddana sidoo kale waa gobalka afraad ee ugu balaaran, taasoo ka dhigan inay fududahay inaad ku damaashaado dabeecadda gobalka.

### Qiimaha Nolosha

Qoysaska ku dhaqan Alberta waxay helaan dakhliga qoyska oo ka sareeya kan ay helaan dadka goballada kale ee Canada.

Alberta ayaa sidoo kale leh faa'iidooyinka la xariira qiimaha nolosha, sida:

- daryeelka caafimaadka guud
- canshuur dhaaf iyo canshuur dhimid si lagaaga caawiyo in lacag kaaga soo harto tamarta

- canshuuraha ugu hooseeya Canada
- dookhyada guryo qiimo jaban
- daryeelka ilmaha oo qiimo jaban

### Caafimaadka

Nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta oo heer caalami ah ayaa dadka siinaaya isbitaallo, rugaha caafimaadka, adeegyada kaladuwan ee taageerada bulshada iyo dhakhaatiir iyo shaqaalaha caafimaadka oo xirfad leh.

### Waxbarashada

#### Dugsiga barbaarinta ilaa Fasalka 12-aad

Alberta waxay leedahay nidaam waxbarasho oo aad u sareeya iskuna dhafan, oo leh dookhyo badan oo ku salaysan luuqada ama diinta. Waxbarashadu waa bilaash laga bilaabo dugsiga barbaarinta ilaa Fasalka 12-aad waana qasab inay dhigtaan ilmaha da'doodu u dhexayso 6 ilaa 16. Dookhyada waxbarashada Kaatooliga iyo Faraankofoon ayaa sidoo kale la heli karaa.

#### Waxbarashada kadib dugsiga sare

Ayadoo ay ku yaalaan 26 jaamacadood iyo kuleej, Alberta ayaa leh dookhyo badan ee waxbarashada dugsiga sare kadib. Kaalmaatayada ay bixiso dawlada Alberta qarashka waxbarashada kuleejka, qiimeyaashuna waa kaladuwan yihiin gobalka oo dhan. Waxaa sidoo kale jira daymo, deeqo, taakulada waxbarashada, deeqaha waxbarashada, abaal marinno iyo maalgelinta kale ee waxbarashada si lagaaga caawiyo bixinta qarashka waxbarashadaada.



Marka aad timaado Alberta si aad u biloowdo waxbarashadaada, xaruntaada jaamacada ee Alberta ayaa kaa caawin doonta la qabsiga bulshadaada cusub ee ardayda. Goobo badan oo ku yaala Alberta ayaa baxsha tababarka luuqada Ingiriisiga, ayna ku jiraan kuleejyo, jaamacado, wakaaladaha u shaqeeya soo galootiga, ganacsiyada gaarka ah iyo ururada diinta iyo kuwa bulshada.

### **Bii'ada iyo cimilada**

Asagoo ah gobalka afraad ee ugu balaaran Canada, dhulka kaladuwan ee Alberta waxaa kamid ah dhul cagaaran, kaymo, buuro, wabiyaal iyo harooyin.

### **Beeraha Nasiinada**

Alberta ayaa aad u ilaalisa bii'ada dabiiciga ah ee dhulka. Alberta ayaa ku faanaaya khayraadkiisa dabiiciga ah wuxuuna aad uga shaqeeyaa xaqiijinta in Beeraha nasiinada ee Alberta la xifdiyo.

Gobalka oo dhan, waxaa ku yaala shan Goobaha Taariikhda Bulshada Caalamka ah oo ay maamusho UNESCO iyo shan beeraha nasiinada qaranka ah, iyo sidoo kale in ka badan 450 beeraha nasiinada ee gobalka ah iyo goobaha la ilaaliyo ee lugaynta dheer, buuraha lagu wado baaskiilka, kaluumaysiga, doomaha shiraaca leh, iyo meelaha dabka lagu shito ee dalxiiska.

### **Cimilada**

Alberta waxay leedahay afar xili sanad kasta: gu'ga, xagaaga, dayrta iyo jiilaalka. Cimiladeena xiliga xagaaga waa kulayle, oo leh heerkul gaaraayaa 30C, halka cimilada jiilaalku ay aad u qaboowdahay ilaa ay ka gaarto -30C. Haddii aad xirato dhar ku haboon cimilada, waa macquul inaad banaanka soo marto xiligaad doonto sanadka oo dhan gudaha Alberta.

Alberta waa gobalka ugu qoraxda badan Canada oo dhan asagoo ay qoraxdu soo jeedo 1,900 oo saacadood dhanka waqooyi halka 2,300 oo saacadood ay qoraxdu soo jeedo dhanka koonfureed sanadka oo dhan.

### **Dhaqanka**

Mar kasta wax la sameeyo lagama waayo Alberta. Ayadoo loo yaqaano 'magaalada dabaaldega' ee Canada, Edmonton ayaa qabata in ka badan 50 xafadaha gaarka ah sanad kasta, sida Dabaaldega Hidaha iyo Dabaaldega Tiyaatarka Caalamiga ah ee Fringe. Calgary Stampede ayaa aduunyada caan uga noqotay ciyaaranteeda dibiga iyo bandhiga oo loogu dabaal degaayo dhaqanka dhanka galbeed ee gobalka.

### **Bulshooyinka ku hadla Faranjiga ee ku dhaqan Alberta**

Bulshada Alberta ee luuqadooda hooyo tahay Faranjiga (Francophone) ayaa kamid ah bulshooyinka ugu badan dhanka kobaca ee ku hadla Faranjiga oo ku nool Canada, ayagoo gaaraaya ku dhawaad 87,000 oo qof. Alberta waxay leedahay ku dhawaad 2,000 oo xarumaha bulshada iyo dabiicada ah oo magacyadoodu yihiin afka Faranjiga. Afar magaallo oo ku yaala Alberta ayaa rasmiyan looga hadlaa labo luuqadood, ayna ku jiraan Beaumont, Legal, Falher iyo Plamondon.

Nidaamka waxbarashada ee Alberta ayaa leh dookhyada kaladuwan ee luuqada Faranjiga, ayna ku jiraan dugsiyada Francophone, koorsooyinka Wax ku Barashada Faranjiga iyo Luuqada Faranjiga ah oo loo Barto Luuqad Labaad ahaan.





# SI KU MEEL GAAR AH U SOO BOOQO ALBERTA

Ka fakar dookhyadaada booqashada, wax ka barashada ama ka shaqaynta si ku meel gaar ah Alberta.

# Si ku meel gaar ah u soo booqo Alberta

## Arag adeegyada aad ka helayso gobalkeena



### Booqo Alberta

Haddii aad soo booqanayso Alberta adoo ah dalxiise, sabab ganacsi ama si aad u soo aragto ehelkaaga, waxaad u baahan kartaa Fiisada booqdaha ee Canada ama ogolaanshaha socdaalka ee elektarooniga ah (eTA) oo ay bixiso Dawlada Canada.

### Fiisooyinka Booqdaha

Si aad u booqato Alberta adoo ah dalxiise, waxaad u baahan kartaa fiisaha booqdaha ee Canada. Fiisooyinka booqdaha ayaa noqon kara kuwa aad kusoo geli karto halmar ama marar badan waxayna leeyihiin taariikhaha dhicitaanka oo aad u kaladuwan. Fiisadu waa inay shaqaynayso marka aad imaanayso Canada.

Fiisada Wayn ee Waalidka ama Awoowe/Ayeeyo waa fiiso aad marar badan ku imaan karto taasoo la bixin karo muddo 10 sano ah. Waxay u sahlayso waalidiinta iyo awooweyaasha/ ayeeyooyinka inay booqdaan qoyska jooga Canada intay doonaan—waxayna joogi karaan ilaa 5 sano booqasho kasta.

### Booqashooyinka ganacsiga

Waa qasab inaad ku codsato fiisada ka booqde ganacsi ahaan haddii aad doonayso inaad u imaanayso Canada si aad u hesho qaabab aad ku hormarinayso ganacsigaaga, maal gashi ku samaynayso ama aad ku kobcinayso xariirada ganacsigaaga. Booqdeyaasha ganacsiga ayaa joogi kara wadanka ilaa lix bilood. Si aad u joogto muddo dheeri ah ama uga shaqayso Canada, codso ogolaanshaha shaqada.







## Wax ka baro Alberta

Nidaamka waxbarashada jaamacadaha ee Alberta ayaa haysta aqoonsi caalami ah oo ku aadan jaamacadaha, kuleejyada, machadyada farsamada iyo xarumaha cilmi baarista hal abuurka ee cajiibka ah.

Kuleejyada iyo jaamacadaha Alberta waxay baxshaan barnaamij waxbarasho oo tayo badan kaasoo soo jiita ardayda ugu fiican ee ugu dedaalka badan ee aduunyada oo dhan si ay u sameeyaan cilmi baaris naf badbaadin iyo isbadel nololeed ku dhisan. Sidoo kale waxaad helayso fursad shaqo intaad waxbaranayso iyo kadib marka aad qalin jebiso, ayna ku jiraan qaabab aad ku helayso daganaansho rasmi ah.

Dookhyada kuleejyada iyo jaamacadaha ku yaala Alberta ayaa baxsha shahaadooyin, diplomooyin, shahaadooyinka kuleejka, tababarada shaqada iyo barnaamijyada sii wadista waxbarashada oo la xariira xirfdaha iyo shaqada farsamada. Waxaa jira barnaamijyo kaladuwan oo buuxinaaya higsiyadadaada xirfadeed - laga bilaabo daryeelka caafimaadka ilaa sayniska iyo tignooloojiyada.

Haddii aad qorsheynayso inaad wax ka barato Alberta wax ka badan lix bilood adoo dhiganaaya machad waxbarasho oo gaar ah, waxaad u baahan tahay ogolaanshaha waxbarashada ee Canada.



## Ka shaqee Alberta

Shaqaalaha ku meel gaarka ah ee shisheeye ayaa taageero muhiim ah siiya dhaqaalaha Alberta ayagoo ku biiriya xirfadahooda iyo aqoontooda si loo taageero kobaca iyo hal abuurka dhammaan gobalka.

### Barnaamijka Shaqaalaha Ku meel Gaarka ah ee Shisheeye (TFW)

Barnaamijka TFW waxaa maamusha Dawlada Canada wuxuuna u sahlayaa muwaadiniinta u qalma ee wadamada kale inay codsadaan inay ka shaqeeyaan Canada muddo ku meel gaar ah ama ilaa saxeex sano. Barnaamijka ayaa daboolaa dhammaan jagooyinka iyo heerarka xirfada. Marka lagasoo tago inaad shaqo ka helayso shirkad ku taala Alberta, waxaad u baahan kartaa ogolaanshaha shaqada ama Qiimaynta Saamaynta Suuqa Shaqaalaha (LMIA). LMIA waxaa ku jira shuruudo gaar ah, sida meesha iyo cidda aad u shaqayn karto, nooca shaqada ee aad samayso iyo mudada aad ka shaqayn karto Canada.

Xafiiska Talo Bixinta Shaqaalaha Shisheeye ee Ku meel gaarka ah ayaa ka caawinaaya shaqaalaha shisheeye ee ku meel gaarka ah, ardayda ka yimaada wadamada kale (ee haysta ogolaanshaha shaqada) iyo loo shaqeeyayaasha inay fahmaan xaquuqdooda ayna helaan xalalka arimaha la xariira xaaladaha aan cadaalada ahayn, badqabka lahayn ama caafimaad xumada leh ee shaqada.

## **Barnaamijka Socdaalka Caalamiga ah (IMP)**

Barnaamijka Socdaalka Caalamiga ah, oo ay maamusho Dawlada Canada, ayaa u sahlaaya shirkadaha Canadian-ka ah inay shaqo siiyaan shaqaalaha shisheeye ee aan haysan LMIA. Shaqadaadu waa inaysan u baahnayn LMIA si aad ugu qalanto mid kamid ah ogolaanshiyaasha shaqada ee IMP (ee laga dhaafay shardiga LMIA):

Ogolaanshaha gaarka ah ee shaqada ee loo shaqeeyaha ayaa kuu sahlaya inaad u shaqayso shirkad shaqo oo gaar ah. Waxaa heli kara dadka ka shaqayn kara Canada si ku meel gaar ah ayagoo soo maraaya heshiisyada ganacsiga ee caalamiga ah.

Ogolaanshaha shaqada Furan ayaa kuu sahlaaya inaad u shaqayso shirkad muddo gaar ah oo cayiman. Waxay u furan tahay ardayda caalamiga ah, xaasaska/laamaneyaasha caadiga ah, dadka shisheeye ee u qalma iyo da'yarta doonaaya inay safraan ayna shaqeeyaan.



### **Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo**

Ogolaanshaha socdaalka ee elektarooniga ah  
[canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/visit-canada/eta.html](https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/visit-canada/eta.html)

Xog badan ka ogoow wax ka barashada Alberta  
[study.alberta.ca/](https://www.study.alberta.ca/)

Fiiri inaad u qalanto barnaamijka TFW  
[cic.gc.ca/CometoCanada](https://www.cic.gc.ca/CometoCanada)

Codso Barnaamijka TFW  
[cic.gc.ca/english/work/apply-who-nopermit.asp](https://www.cic.gc.ca/english/work/apply-who-nopermit.asp)

Raadi inaad u baahan tahay LMIA  
[cic.gc.ca/english/work/apply-who-permit.asp](https://www.cic.gc.ca/english/work/apply-who-permit.asp)

Xogta qofka wadanka jooga mudada ku meel gaarka ah  
[alberta.ca/temporary-residents.aspx](https://www.alberta.ca/temporary-residents.aspx)

Khayraadka shaqaalaha shisheeye ee mudada kooban  
<https://www.alberta.ca/resources-temporary-foreign-workers.aspx>

### **La xariir Xafiiska Talo Bixinta ee TFW**

[lbr.tfwao@gov.ab.ca](mailto:lbr.tfwao@gov.ab.ca)

Xarunta Waqooyiga – Edmonton: 780-644-2584

Xarunta Koonfurta – Calgary: 403-476-4540



# SI RASMI AH U DEG ALBERTA

Raadi dookhyada aad ku helayso daganaansho rasmi ah.

## Si rasmi ah u deg Alberta

Hel barnaamijyada soo galootiga ee heer gobal iyo kuwa heer federaal

### Guudmar

Waxaa jira barnaamijyada kaladuwan ee soo galootiga iyo qaababka aad mari karto si aad ugu soo guurto Alberta— midkood adoo ah shaqaale ama shaqo abuur. Marka aad daganaansho rasmi ah hesho ama noqoto muwaadin Canada meesha aad rabto ayaad ka aadi kartaa Canada.

Waxaa jira barnaamijyada soo galootiga ee federaalka (Dawlada Canada) iyo barnaamijyada heer gobal (Dawlada Alberta). Gudaha Alberta, barnaamijka gobalka waxaa la yiraahdaa Barnaamijka Faa'iidada Soo galootiga ee Alberta (AAIP).



### Barnaamijka xulashada ee gobalka – Barnaamijka Faa'iidada Soo galootiga ee Alberta

Barnaamijka Faa'iidada Soo galootiga ee Alberta waa barnaamijka soo galootiga dhaqaalaha oo xulanaaya dadka gacanta ka gaysanaaya buuxinta baahiyaha gobalka ee shaqaalaha iyo ganacsi abuurista.

Dhammaan nidaamyada ayaa qaada qarashka codsiga oo aan lagu soo celin doonin.

Barnaamijka ayaa leh marinno lagu xusho dadka ka shaqeeya ama doonaaya inay ka shaqeeyaan Alberta, iyo sidoo kale ganacsi abuurayaasha doonaaya inay ganacsi ka aasaasaan gobalka.

## Xulashooyinka shaqaalaha

<b>Hanaanka Alberta Opportunity</b>	Waxaa loogu talagalay codsadeyaasha u qalma ee ku nool kana shaqeeya Alberta haystana shaqo buuxda oo uu siiyay loo shaqeeye reer Alberta ah.
<b>Hanaanka Soo Gelitaanka Degdega ah ee Alberta</b>	Waxaa loogu talagalay codsadeyaasha u qalma ee lagasoo xusho nidaamka Gelitaanka Degdega ah ee Dawlada Canada kuwaasoo muujiyay inay xariiro adag la leeyihiin Alberta ama ka caawin kara Alberta muhiimadaha kobaca dhaqaalaha iyo isku dhafka bulshada.
<b>Qaabka Teknooloojiyaddu Dedejiso</b>	Waxaa loogu talagalay codsadeyaasha hadda u shaqeeya, ama ka helay yabooh shaqo, loo shaqeeye ka shaqeyaa farsamada oo Alberta ku taala lana siiyay shaqo farsamo oo u qalanta.
<b>Hanaanka Soo Noolaynta Deegaannada Miyiga ah</b>	Waxaa loogu talagalay dadka shisheeyaha ah ee shaqada buuxda ka helay loo shaqeeye reer Alberta ah si ay uga shaqeeyaan deegaan gaar ah oo miyiga Alberta ku yaala.

## Hanaanka lagu xusho ganacsi abuureyaasha

<b>Hanaanka Shaqo Abuuraha Heerarka sare ee Jaamacada</b>	Waxaa loogu talagalay ardayda qalin jebisay ee caalamiga ah kana baxay jaamacadaha Alberta ee la aqoonsan yahay doonaayana inay ganacsi ka abuuraan ama ganacsi jiray ka iibsadaan gobalka.
<b>Hanaanka Shaqo Abuuraha ee Ardayda Shisheeye ee dhamaysatay Heerarka sare ee Jaamacada</b>	Waxaa loogu talagalay ardayda shisheeye ee qalin jebisay ee baratay sayniska, tignooloojiyada, injineeriyada iyo xisaabta (STEM), kana yimid dibada Canada, doonaayana inay ganacsi cusub ka aasaasaan ama mid horey u jiray kasii anbo qaadaan Alberta.
<b>Hanaanka Shaqo Abuuraha Deegaannada Miyiga ah</b>	Waxaa loogu talagalay loo shaqeeyaasha diyaarka u ah inay fursado ganacsi ka abuuraan deegaannada miyiga ah. Ayagoo bilaabaaya ganacsi ama iibsanaaya mid horay u jiray, dadkaan cusub ee gobalka imaanaaya ayaa abuuri kara shaqooyin korna u qaadaaya dhaqaalaha deegaanka ee goobaha ka baxsan magaalooyinka waawayn ee Alberta.
<b>Hanaanka Beeraha</b>	Waxaa loogu talagalay beereleeyda khibrada leh ee doonaaya inay iibsadaan ama ka aasaasaan beer gudaha Alberta.





## Barnaamijyada federaalka

Dawlada Canada ayaa korka kala socota dhammaan soo galootiga imaanaaya wadanka.

### Fiisada Degdega ah ee Gelitaanka Canada

Fiisada Degdega ah ee gelitaanka waa nidaam maamulka elektarooniga ah ee codsiyada daganaanshaha rasmiga ah oo ay maamusho laanta Soo galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada (IRCC).

Si aad u galaan Fiisada Degdega ah, codsadeyaashu waa inay marka hore buuxshaan galka xogta, kaasoo muujinaaya sida ay u buuxinayaan shuruudaha mid kamid ah barnaamijyada soo galootiga federaalka ee dhaqaalaha:

- Dabaqadda Khibrada leh ee Canada
- Barnaamijka Shaqaalaha Xirfada leh ee Federaalka
- Barnaamijka Xirfadaha Gaarka ah ee Federaalka

Marka la dhamaystiro codsada ayaa lagu qiimayn doonaa nidaam sameeya qiimayn. Codsadeyaasha hela buundada ugu saraysa ayaa helaaya martiqaad uga imaanaaya IRCC si ay u codsadaan daganaanshaha rasmiga ah.

### Barnaamijyada biloowga soo galootiga

**Nidaamka Soo galootiga Miyiga iyo Waqooyiga** waa barnaamij bulshadu hormuud u tahay oo balaarinta faa'iidooyinka soo galootiga dhaqaaluhu ku yeelanayaan bulshooyinka yaryar ayadoo la abuurayo hanaanka ay daganaanshaha rasmiga ah ku helayaan shaqaalaha xirfada leh ee shisheeye ee doonaaya inay ka shaqeeyaan kuna noolaadaan deeganadaas.

**Nidaamka Beeraha-iyo-cuntada** ayaa gacan ka gaysta xal u helida baahiyaha shaqaalaha ee ka jira waxda beeraha iyo wax soo saarka cuntada ee Canada. Nidaamku wuxuu abuuraa marinka ay daganaansho rasmi ah ku helayaan shaqaalaha khibrada leh, ee aan xili gaar ah shaqayn kana shaqeeya ganacsiyo iyo shaqooyin gaar ah.

### Barnaamijyada soo galootiga ganacsiyada

Barnaamijyadaan waxay siiyaan ganacsi curiyayaasha iyo dadka iskood u abuurta shaqada ee ka yimaada wadamada kale qaabka ay ku helayaan daganaansho rasmi ah.

Haddii aad hayso fikir ganacsi oo hal abuur leh ama qorshe, waxaad codsan kartaa **Fiisada Ganacsi Abuurista**. Fikirkaaga ganacsi waa inuu taageeray urur loo asteeyay.

Haddii aad doonayso inaad shaqo kuu gaar ah ka abuurato Alberta, waxaad codsan kartaa **Barnaamijka Dadka Iskood Ganacsiga u abuurta**. Waa qasab inaad khibrad macquul ah u leedahay hawlaha dhaqanka ama ciyaaraha.

### Barnaamijka Isboonsarka Qoyska

Barnaamijka Isboonsarka Qoyska wuxuu u sahlayaa muwaadiniinta Canada ama dadka daganaanshaha rasmiga ah haysta inay u dacwoodaan qaraabooda si ay u helaan daganaanshaha rasmiga ah oo ay awood ugu yeeshaan inay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan ayna wax ku bartaan Alberta.

### Barnaamijka Daryeelaha

Barnaamijka Daryeeyaasha waxaa loogu talagalay daryeeyaasha leh khibrada labada sano ah ee Canada gudaheeda oo la xariirta daryeelida ubadka ama taageerada guriga ee duqoowda ama dadka naafada ah.

### Dib u dejinta qaxootiga

Barnaamijka Dib u Dejinta Qaxootiga iyo Gargaarka Aadanaha waxaa loogu talagalay dadka u baahan difaaca ee ku nool banaanka Canada iyo wadankooda. Waxay sidoo kale siinaysaa fursad in dadku u dacwoodaan qaxootiyaasha.

### Qaabka kale ee wadanka lagu yimaado

Haddii aad joogto Canada, aadna dhib wayn kala kulmayso haddii aad ku laabato wadankaagii hooyo, waxaad u qalmi kartaa tixgelinnada banii'adanimada iyo naxariista.

Haddii aad Canada ku joogto ogolaanshaha degaansho oo ku meel gaar ah, waxaad u qalmi kartaa inaad degaansho rasmi ah ku codsato heerka qofka ogolaanshaha haysta haddii lagu aqoonsado inaan Canada ku aqbalin.



## Waxyaabaha ay tahay inaad ka fakarto

- Uma baahnid inaad qabsato wakiil ama qareen dhanka soo galootiga ah si uu kaaga caawiyo codsigaaga soo galootiga.
  - Adeegsiga wakiilka ama qareenku ma boobsiinayso hanaanka codsiga. Haddii aad go'aansato inaad adeegsato wakiil, dawladaha Canada iyo Alberta ayaa wali toos kaala soo xariiri doona codsigaaga. Haddii aad gaarto dookh kuu gaar ah oo aad adeegsato wakiil si uu kuu caawiyo waa inaad buuxisaa foom sheegaaya inaad adeegsanayso wakiil ama codsigaaga waa la diidi karaa.
  - Dhammaan xogta aad u baahan tahay si aad u codsato inaad u soo guurto Alberta waa bilaash, hase yeeshee waxaa jirta lacagta codsiga. Adeegso foomka saxda ah ee barnaamijka aad codsanayso.
  - AAIP ayaa u baahan turjumaad la aqoonsan yahay. Keen turjumaad la aqoonsan yahay ee dukumiintiyada kasta oo aan ku qornayn Ingiriis ama Faranji soona dir dukumiintigaaga oo wata koobiyada orijinaalka ah. Booqo xarunta Association of Translators and Interpreters of Alberta (ATIA, Ururka Turjumaannada iyo Fasireyaasha ee Alberta) si aad u hesho turjumaan shahaado haysta oo ku dhaqan Canada.
- Kahor intaadan codsan barnaamij soo galooti, raadi koodhka Nooca Shaqeed ee Qaran (NOC) si aad u go'aamiso u qalmidaada soo galootiga ee federaalka ama gobalka. Nidaamka NOC, oo ay samaysay Dawlada Canada, ayaa qayb u sameeyay shaqo kasta oo ka jirta Canada.

### Iska ilaali tuugada Interneedka iyo webseedyada been abuurka ah.

Ma jiro qof shaqo ama fiisa kuu damaanad qaadi kara Canada. Keliya shaqaalaha socdaalka ee Canada, safaaradaha Canada, qunsullada iyo wakiillada ayaa go'aan ka gaari kara bixinta fiisaha.

Baro sida aad naftaada uga difaacayso tuugada socdaalka. [canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/protect-fraud.html](https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/protect-fraud.html)

## Lifaaqyo kooban

Nidaamyada AAIP ee Soo Galootiga  
<https://www.alberta.ca/alberta-advantage-immigration-program.aspx>

Barnaamijyada Dawlada Canada  
<https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/immigrate-canada.html>

Association of Translators and Interpreters  
[atia.ab.ca/](https://www.atia.ab.ca/)

Hel Qaybta Noocaaga Shaqeed ee Qaran  
<https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/immigrate-canada/express-entry/eligibility/find-national-occupation-code.html>

Ogoow in wakiilkaagu shaciyaysan yahay iyo in kale  
<https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/immigration-citizenship-representative/choose/authorized.html>

A woman with curly brown hair, wearing glasses and a gold and black necklace, is smiling while looking at a tablet computer. She is wearing a dark grey top and a watch on her left wrist. The background is a bright, out-of-focus office or workspace.

## **KA SHAQEE ALBERTA**

Mushaaraadka Alberta waa mid kamid ah kuwa ugu sareeya wadanka Canada. Baro sida loo helo fursadaha oo shaqo looga helo gobalkeena.



## Ka shaqee Alberta

Xog ku saabsan shaqo ka helida Alberta iyo shahaadooyinka waxbarashada

### Hel shaqo

Mushaaraadka Alberta waa mid kamid ah kuwa ugu sareeya wadanka Canada. Mushaaraadka lagu baxsho Alberta ayaa kaladuwan waxayna ku xiran yihiin cidda loo shaqeeyo, saacadaha la shaqeeyo iyo caddaymaha waxbarashada, iyo sidoo kale khibrada loo baahan yahay iyo masuuliyadaha shaqada.

Waxaa jira tiro ururo iyo khayraad ah oo kaa caawin kara helitaanka shaqo iyo dhisida xirfadaada gudaha Alberta:

- Xarumaha Taageerada ee Alberta ayaa baxsha barnaamijyada iyo adeegyada shaqada ee dhammaan Alberta. Tan waxaa ku jira bandhigyada shaqada, aqoon kororsiyada, xiisadaha xog bixinta, iyo xogta suuqa shaqaalaha.
- Alis waa bar oonlayn ah oo ku siinaysa talo ku aadan helitaanka shaqo, abuurista siifiiga iyo u diyaar garoowga waraysiga, iyo ka niqaashida mushaarkaaga.
- Wakaaladaha u shaqeeya soo galootiga ayaa siiya soo galootiga adeegyo, ay ku jirto caawimaad ku aadan helitaanka shaqo
- Aasaasiyaadka Raadinta Shaqada ayaa ku siinaysa aqoonta iyo khayraadka si aad shaqo uga hesho Alberta.
- Kaydka Shaqooyinka ee Dawlada Canada ayaad ka helaya liiska fursadaha shaqo ee hadda ka banaan Alberta—shaqooyin cusub ayaa lasoo xayeysiiyaa maalin kasta. Si aad u yarayso waqtiga kaaga baxa raadinta, raadi shaqooyin ku haboon xirfadaha iyo khibrada aad leedahay adoo adeegsanaaya Job Match (Isku Aadinta Shaqada).
- Goobaha kale oo aad ka raadin karto shaqada waxaa kamid ah Boorarka Shaqada lagusoo dhajiyay ee Alberta iyo webseedyada xayeysiiya fursadaha ka banaan Alberta.

### Xariirka iyo la hadlida dadka

Qaab kale oo aad shaqo ku helayso waa abuurista shabakad. Tani waxay ka dhigan tahay inaad la hadasho saaxiibada, dariska ama dadka ku nool deegaankaaga inay kuu sheegaan shaqooyinka aan la xayeysiin.



Barnaamijyada soo socda ee hagitaanka ayaa kugu xiraaya qof ka shaqeeya xirfadaada:

- Golaha Shaqada Soo Galootiga ee Aagga Edmonton (ERIEC)
- Golaha Shaqada Soo Galootiga ee Aagga Calgary (CRIEC)

### Iska diiwaan geli wakaaladaha shaqaalaynta

Wakaaladaha shaqaalaynta ee haysta ruqsada ayaa sidoo kale kaa caawin kara helitaanka shaqada saxda ah. Wakaaladaha qaar ayaa ku taqasusay raadinta boosaska shaqo ee ku meel gaarka ah. Qaar kale waxay diirada saaraan suuqyo gaar ah. Wakaaladaha shaqadu kaama qaadi karaan qarash ku aadan inay kaa caawiyeen raadinta shaqada. Qarashka waa inuu daboolaa loo shaqeeyaha shaqaalaha raadinaaya.

### Samayso ama qurxi siifiigaaga iyo waraaqda codsiga shaqada

Siifiigaaga waa inaad ku qortaa xirfadahaaga aadna ku xustaa kuwa gaarka ah ee loo shaqeeyuhu u baahan yahay. Waraaqdaada codsiga shaqada waa inay markasta noqotaa hal bog oo soo koobaaya khibradaada sharaxaadna ka bixinaaya sababta aad u tahay codsada uga ugu haboon shaqada.

## Baar dookhyada aad haysato

Waxaad u baahan kartaa inaad codsato shaqooyin kaladuwan kahor intaadan helin shaqo. Iskuday inaad codsato shaqooyinka la xariira aag gaar ah si ay kaaga caawiso inaad yeelato khibrad muhiim ah ama aad raadsato dallacaad waxbarashadaada.

Tabarucaadda ayaa kaa caawin karta inaad hesho khibrada shaqada ee Canada, kor u qaado xirfadahaaga aadna hormariso shabakadaada xirfada iyo shaqsiyeed.

Shaqo ku meel gaar ah ayey dhici kartaa inaanay ku fiicnayn waxbarashadaada ama tababarkaaga xirfada. Hase yeeshee, waxay kaa caawin kartaa dhisida khibrada shaqada ee Canada, inaad kor u qaado xirfadahaaga Ingiriisiga, inaad xog badan ka ogaato dhaqanka goobta shaqada ee Canada, inaad la kulanto dad cusub, aadna dad kala duwan isbarataan.

## Shahaadooyinka iyo caddaymaha

Caddaymaha waxbarashada iyo xirfada iyo jaangoynaha ayaa kaladuwan wadamada kaladuwan. Waxaad u baahan kartaa in shahaadooyinkaaga wadanka shisheeye la qiimeeyo lana eego sida ay u waafaqsan yihiin jaangoynaha waxbarashada ee Alberta.

Shahaadooyinkaaga waxbarashada waa shahaadooyin muujinaaya inaad dhamaysay dugsi sare ama jaamacad. Adeegga Qiimaynta Caddaymaha Caalamiga ah (IQAS) ayaa qiimayn doona shahaadooyinka waxbarashada wadanka kale si loo eego sida ay ugu dhigmi karaan jaangoynaha Alberta.

## Shaqooyinka la maamulo

Shaqooyinka la maamulo ayaa u baahan aqoonsi ka yimaada ururada maamuleed ee xirfada si loo xaqiijyo in shaqaaluhu buuxiyaan jaangoynaha shaqada. Kahor intaadan imaan Canada, waa in qiimayn lagu sameeyaa shahaadooyinkaaga sababo soo galooti awgood. Marka aad tagto Canada, waxaa jira hanaan gaar ah si lagu siiyo ruqsada ku shaqaynta xirfadaada. Waxaa lagugu boorinayaa inaad la xariirto ururka maamuleed ee xirfada si xirfadaada loo xaqiijyo kahor intaadan imaan Canada si aad u fahanto hanaanka muhiimka ah.

Waxaad u baahan tahay shahaadooyin nidaamsan si aad uga shaqayso ganacsi gaar ah oo ku yaala Alberta. Kahor intaadan codsan ama aqbalin shaqo gudaha Alberta, xaqiiji in shahaadooyinkaagu ay buuxshaan heerarka gobalka. Haddii aan shahaadooyinkaaga laga aqoonsanayn Alberta, waxaad samayn kartaa midkood a) inaad noqoto shaqaale tababar shaqo ku jira; ama b) inaad adeegsato khibradaada shaqo si aad u codsato barnaamijka u qalmida ganacsiga si aad u hesho aqoonsiga ganacsigaaga.

## Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

Xarumaha Taageerooyinka ee Alberta  
[alberta.ca/alberta-supports.aspx](http://alberta.ca/alberta-supports.aspx)

Alis  
[alis.alberta.ca/look-for-work/](http://alis.alberta.ca/look-for-work/)

Adeegyada shaqaalaynta  
[alberta.ca/employment-services.aspx](http://alberta.ca/employment-services.aspx)

Ururka Wakaaladaha Alberta ee U adeegga Soo-galootiga (AAISA)  
[aaisa.ca/membership-directory/](http://aaisa.ca/membership-directory/)

Aasaasiyaadka Shaqo Raadinta  
[alis.alberta.ca/look-for-work/find-work/work-search-basics/](http://alis.alberta.ca/look-for-work/find-work/work-search-basics/)

Kaydadka shaqada  
[ab.jobbank.gc.ca/home-eng.do](http://ab.jobbank.gc.ca/home-eng.do)  
[alis.alberta.ca/occinfo/jobs-in-alberta/](http://alis.alberta.ca/occinfo/jobs-in-alberta/)  
[alis.alberta.ca/categories/look-for-work/job-banks/](http://alis.alberta.ca/categories/look-for-work/job-banks/)

Barashada dad kala duwan  
Edmonton - [eriec.ca/career-mentorship-program/](http://eriec.ca/career-mentorship-program/)  
Calgary - [criec.ca/](http://criec.ca/)

Aqoonsiga Caddaynta Shisheeye  
[alberta.ca/foreign-qualification-recognition.aspx](http://alberta.ca/foreign-qualification-recognition.aspx)

Adeegga Qiimaynta Caddaymaha Caalamiga ah (IQAS)  
[alberta.ca/IQAS](http://alberta.ca/IQAS)

Volunteer Alberta  
[volunteeralberta.ab.ca/for-volunteers/find-a-volunteer-opportunity/](http://volunteeralberta.ab.ca/for-volunteers/find-a-volunteer-opportunity/)



## GANACSI KA FURO ALBERTA

Dadka reer Alberta ayaa caan ku ah ganacsi abuurida ay taageerayaan shaqaale da'yar ah, waxbartay, oo kaladuwan. Waxaan sidoo kale leenahay canshuurta ugu hoosaysa ee laga qaado shirkadaha Canada oo dhan mana qaadno canshuurta iibka ee gobalka.

# Shaqo ka abuur gudaha Alberta

## Xog ku saabsan sida ganacsi loo furto

### Guudmar

Alberta waa goob ku wanaagsan inaad ka furto ganacsi. Dadka reer Alberta ayaa caan ku ah ganacsi abuurida ay taageerayaan shaqaale da'yar ah, waxbartay, oo kaladuwan. Waxaan sidoo kale leenahay canshuurta ugu hoosaysa ee laga qaado shirkadaha Canada oo dhan mana qaadno canshuurta iibka ee gobalka.

Waxaan ku soo dhawaynaa soo galootiga cusub ee hibada leh iyo ganacsatada shaqooyinka abuuraya kuwaasoo usoo guuraaya, ku noolaanaaya kana shaqeyn doona Alberta.

Fiiri Barnaamijka Faa'iidada Soo Galootiga ee Alberta (bogga 11) si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada kuu sahlaaya inaad ganacsi furto aadna si rasmi ah u degto Alberta.

Haddii aad qabto su'aalo ama u baahan tahay in lagaa caawiyo codsiga, iimeel u dir [entrepreneur.supportservice@gov.ab.ca](mailto:entrepreneur.supportservice@gov.ab.ca).

### Khayraadka

#### Ganacsiyada Yaryar ee ku yaala Alberta

Alberta ayaa hogaanka u haysa wadanka oo dhan marka laga hadlaayo abuurista ganacsiyada yaryar.

Marka ay ganacsi furanayaan, ganacsi curiyayaasha reer Alberta ayaa helaaya bixiyayaasha barnaamijka iyo adeegga kuwaasoo siinaaya taageero ku aadan talo iyo hagitaan, dhaqaale iyo tababar iyo xog ku saabsan balaarinta suuqyada iyo maalgelinta deeqda ah.

Baro sida ganacsi looga furto Alberta, loo maamulo ganacsi iyo sida lagu helo ruqsadaha iyo ogalaanshaha ganacsiyada yaryar.

### Business Link

Business Link waxay siisaa adeegyo ganacsi curiyayaasha soo galootiga ah. Adeegyadan waxaa ku jira:

- taageerooyinka hagidda qof-iyo-qofka ah
- khayraad xog bixinta ah, buugaag hage ah iyo liiska adeegyada
- tababar iyo aqoon kororsiyo
- dhisida baahinta barashada dad kala duwan

### Community Futures Alberta

Community Futures Network of Alberta (CFNA, Shabakada Khayraadka Bulshada ee Alberta) ayaa bixisa hormarinta ganacsiyada yaryar iyo dhaqaalaha miyiga oo lagu baxsho 27 xafiis oo Community Futures ku leeyihiin baadiyaha Alberta.

Adegeyada ay baxshaan shaqaalaha CFNA waxaa kamid ah:

- inay kaa caawiyaan qorista qorshe ganacsi
- qorshaha suuqgaynta ama istaraatiijiyada balaarinta ganacsiga
- tababar iyo talo bixin ganacsi oo qof-iyo-qof ah

### Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

Abuurtista ganacsi yar  
[alberta.ca/small-business-resources.aspx](http://alberta.ca/small-business-resources.aspx)

Business Link  
[businesslink.ca/what-we-do/immigrant-entrepreneur-program/](http://businesslink.ca/what-we-do/immigrant-entrepreneur-program/)

Community Futures Network of Alberta  
[albertacf.com/](http://albertacf.com/)

An aerial photograph of a city, likely Edmonton, Alberta, Canada. The foreground is dominated by a dense forest of green trees. In the middle ground, a wide river flows through the city, with a prominent white arch bridge crossing it. The city skyline is visible in the background, featuring various buildings and structures. The sky is bright blue with scattered white clouds.

# DEEGAAN KA DHIGO ALBERTA

Aqoonso faahfaahinnada maalin kasta ee nolashaada cusub ee Alberta: laga bilaabo guriga ilaa waxbarashada.

# Deegaan ka dhigo Alberta

## Xog kaa caawinaysa inaad degto Alberta

### Kahor intaadan imaan

Labadaba Dawlada Canada iyo dawlada Alberta ayaa baxsha xogta imaatinka kahor iyo adeegyada soo galootiga cusub. Qaar kamid ah adeegyadaan ayay keliya heli karaan dadka ka baxsan Canada halka qaar kamid ah adeegyada aad heli karto marka aad timaado Canada aadna hesho daganaanshaha rasmiga ah. Waxaa sidoo kale jira adeegyo gobalku siiyo dadka sida ku meel gaarka ah ku dagan wadanka ee haysta ogolaanshaha shaqada, dadka Canada ee guurka ku yimid, iyo dadka codsanaaya qaxootinimada.

### Xogta gobalka

Kahor intaadan imaan Alberta, waa inaad soo qaadataa dukumiintiyadaada muhiimka ah si aad u badbaadiso waqtiga iyo lacagta. Waxaad u baahan doontaa inaad dukumiintigaan u dirto loo shaqeeyaasha, maamulayaasha gobalka, xarumaha waxbarashada, iyo wakaaladaha qiimaynta shahaadooyinka.

Dukumiintiyadan waxaa ku jira:

- baasaboorada saxda ah
- dukumiintiyada soo galootiga
- waraaqaha tixraaca shaqada
- waraaqaha natiijada ee dugsiga/jamacada

### Adeegyada federaalka

Marka IRCC ay xaqiijiso codsigaaga daganaanshaha rasmiga ah – haddii aad wali jirto banaanka Canada – adiga iyo qoyskaaga ayaa heli kara adeegyada bilaashka ah ee tooska ah ama oonlaynka ah si lagaaga caawiyo u diyaar garoowga iyo la qabsiga nolosha Canada.

Adeegyadaan kahor intaadan imaan la baxsho ayaa kaa caawin kara:

- inaad u diyaar garoowdo u guurista Canada
- inaad hesho aqoonsiga waxbarashadaada, khibradaada shaqada iyo dukumiintiyada oo laga aqoonsado Canada
- inaad la xariirto loo shaqeeyayaasha si aad u hesho shaqo
- inaad la xariirto adeegyada bilaashka ah kadib markaad timaado Canada

### Dagista iyo ku milmida bulshada

#### Adeegyada soo galootiga cusub

Alberta waxay leedahay ururada kaladuwan ee soo galootiga oo aad ka helayso adeegyada kaladuwan ee dib u dejinta.

Xog badan ka ogoow adeegyada la heli karo adoo booqanaaya Ururka Alberta ee Wakaaladaha U shaqeeya Soo Galootiga.

Akhri hagaha ku soo dhawoow Canada ee laanta Soo galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada (IRCC)  
([cic.gc.ca/english/pdf/pub/welcome.pdf](https://cic.gc.ca/english/pdf/pub/welcome.pdf))



## Guriyeyn

Shaqsigaad iyo qoysas badan, ayna ku jirana soo galootiga cusub, ayaa kiraysta guryaha ilaa ay kaydsadaan lacag ku filan oo ay ku iibsadaan guri ay dibaaji ku baxshaan (lacag si yaryar loo baxsho).

## Kiraysiga guri

Marka aad kiraysanayso guri, waa inaad saxiixdaa heshiis kiro oo aad la galayso mulkiilaha guriga. Heshiiska ayaa socon kara muddo go'an, tusaale, hal sano, ama kiro bil kasta ah.

Marka lagasoo tago lacagta aad bil kasta ku bixiso kirada, waxaa jiri doona qarashaad kale oo ay tahay inaad bixiso. Qiimeyaasha kirada waxaa ku jiri kara ama aan ku jiri karin qarashka tamarta iyo biyaha, sida korontada iyo dabka – waydii mulkiilaha guriga kahor intaadan saxiixin heshiiska.

Inta badan mulkiileyaasha guryaha ayaa kaa doonaaya inaad bixiso lacag damaanad ah kahor intaadan u soo guurin guriga. Lacagtaan waxaa lagu daboolayaa waxyeelo kasta oo guriga aad u gaysan karto. Haddii aadan cilad ku keenin, waxaad heli doontaa lacagta buuxda marka aad guriga ka gurto.

## libsiga guri

Waxaad guri ka iibsan kartaa Alberta adoo la xariiraaya dalaalka guryaha iibiya ama qof guri iskiis u iibinaaya.

Dalaalka guryaha, oo sidoo kale loo yaqaano wakiilka guryaha iibka ah, waa xirfadle ka caawiya dadka iibsiga iyo iibinta guryaha. Dalaaliintu lacag ayay kaaga qaadayaan adeegyadooda. Inta badan, iibiyaha ayaa baxsha dhammaan qarashaadka dalaalka, laakiin waad waydiin kartaa arintaan kahor intaadan aqbalin inaad la shaqayso dalaalka.



## Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

Adeegga Alberta – Heshiiska kirada

<https://www.alberta.ca/rental-agreements.aspx>

Shirkada Daynta Guryaha iyo Guriyaynta Canada

<https://www.cmhc-schl.gc.ca/en>



## Gaadiidka

### Gaadiidka dadwaynaha

Gaadiidka dadwaynaha ee Alberta waxaa kamid ah basas iyo tareenno. Waxay kaa caawin karaan inaad ku dhex safarto magaallada. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir maamulka magaalada ama oonleynka ka fiiri.

### Safarka meelaha fogfog

Si aad ugu safarto gobalka dhexdiisa iyo banaanka gobalka, dookhyada ugu badan waa baska, tareenka ama diyaarada. Alberta waxay leedahay 11 garoonada diyaarada ah, ayna ku jiraan labo garoon oo caalami ah, mid ku yaala Edmonton iyo mid ku yaala Calgary.

### Helitaanka ruqsada darawalka

Xataa haddii aadan doonayn inaad gaari yeelato ama waddo, waxaa fiican inaad haysato ruqsada darawalka ee Alberta si aad ugu adeegsato aqoonsi ahaan iyo sababo cadayn awgood.

Gobalka Alberta, darawallada cusub waa inay maraan barnaamijka Ruqsada Darawalka Qalin jebiyay (GDL). Barnaamijka waxaa ku jira imtaxaanka aqoonta, Labo sano oo khibrada darawalnimada oo cadayn leh (hal sano oo aadan marna gelin ruqsad hakin) iyo imtaxanaka heerka sare ah ee wadada). Haddii aad horay u haysatay ruqsada dawalka, waxaad awoodi kartaa inaad ku badelato ruqsada Canada ama caalamiga ah si aad u hesho ruqsada Alberta adiga oo aan ka qaybgelin barnaamijka GDL ama in lagu daro khibradaada ruqsada si loo yareeyo waqtiga aad ku jirayso barnaamijka GDL.

### Libsashada, caymis u samaynta iyo diiwaan gelinta gaarie

Gaari ka shaqaynaaya Alberta waa inuu lahaado caymis lana diiwaan gasho kadib marka aad iibsato.

Haddii aadan doonayn inaad lahaato ama wado gaari matoor ku shaqeeya, waxaad codsan kartaa karaka aqoonsiga Alberta si aad ugu adeegsato aqoonsiga iyo cadaynta daganaanshaha..



### Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

libso ama kirayso gaari  
<https://www.alberta.ca/buying-selling-vehicle.aspx>

Caymis geli gaari  
[https://airb.alberta.ca/drivers/getting\\_insurance.aspx](https://airb.alberta.ca/drivers/getting_insurance.aspx)

Qaado taargada gaariga  
<https://www.alberta.ca/licence-plates.aspx>

Hel ruqsada darawalka  
<https://www.alberta.ca/get-drivers-licence.aspx>

Badelo ruqsada darawalka ee aad kala timid banaanka Alberta  
<https://www.alberta.ca/exchange-non-alberta-licences.aspx>





## Daryeelka caafimaadka

### Qorshaha Caymiska Daryeelka Caafimaadka ee Alberta (AHCIP)

Alberta waxay bixisaa caymiska caafimaadka aasaasiga ah oo bilaash ah laguna baxsho AHCIP. Qorshahaan wuxuu daboolayaa dadka haysta daganaanshaha rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahaynba. Ma daboolayo booqdeyaasha ama dalxiiseyaasha.

Waa qasab inaad iska diiwaan geliso AHCIP sadex bilood gudahood kadib markaad timaado Alberta.

### Qarashaadka la daboolaayo

AHCIP wuxuu daboolaa qarashaad badan oo kuwa caafimaadka ah, laakiin ma daboolo wax kasta. Caymis caafimaad oo gaar loo leeyahay ayaa ku haboon adeegyada aan la daboolin. Shirkado badan oo loo shaqeeyo ayaa baxsha qorsheyaasha caymiska oo daboolaaya adeegyadaan. Qarashaad kasta waa in lagu daraa qayb kamid ah mushaarka shaqadaada.

Haddii shirkada aad u shaqayso aysan bixin qorshe caafimaad, ama haddii aad tahay qof iskiis u shaqaysta, waxaad ka iibsana kartaa caymiska caafimaadka ee gaarka ah shirkad caymis.

### Sida aad ku helayso adeegyada daryeelka caafimaadka

Kadib marka aad iska diiwaan geliso AHCIP, Waxaad heli doontaa kaarka daryeelka caafimaadka ee gaarka ah oo daboolaaya adiga iyo qoyskaaga. Waa qasab inaad kaarkaadeedsato marka aad booqato dhakhtarka.

Dhakhtarka, shaybaarka, rugta caafimaadka iyo booqashooyinka isbitaalka ayaad bilaash ugu helayso kaarkaaga. Haddii aadan haysan kaarkaaga, waxaa lagaa qaadi karaa qarashka booqashada.

### Rugaha caafimaadka ee bilaa balanta la tago iyo dhakhaatiirta qoyska

Uma baahnid balan si aad u tagto rug bilaa balan la galo laakiin waa inaad balan qabsataa si aad ula kulanto dhakhtarka qoyska. Akhri qaybta lifaaqyada kooban si aad u hesho dhakhtar aqbalaaya bukaannada cusub.

### Adeegyada caafimaadka ee degdega ah

Haddii aadan si badqab leh ku gaari karin isbitaalka si iskaa ah, wac 911, kadibna aanbalaas ayaa kuu imaanaysa si ay kuu gayso isbitaalka kuugu dhow. Waxaa lagaa qaadi doonaa qarashka aanbalaas haddii aadan haysan caymiska caafimaadka gaarka ah oo daboolaaya adeegaan.

### Adeegyada Caafimaadka Dhimirka

Dad badan ayaa qabi doona xanuunka caafimaadka dhimirka mar uun ka mid noloshooda, oo xataa haddii aadan adigu qabin, waxaa saamayn kaasoo gaari kartaa ciladaha caafimaadka dhimirka ee ehelkaaga. Adeegyada caafimaadka ee bilaashka ah ayaa loo heli karaa xanuunnada caafimaadka dhimirka, balwada, xaaladaha dhibaataada badan iyo kuwo kale.

### Kaalmada dhaqaalaha

Haddii qoyskaagu danyar yahay, waxaad u qalmi kartaa taageerada dhaqaalaha oo aad ka helayso Gunnada Caafimaadka Dadka waawayn ee Alberta ama Gunnada Caafimaadka ee Carruurta Alberta.



### Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

Raadi dhakhtar aqbalaaya bukaannada cusub  
[https://www.albertahealthservices.ca/info/  
Page13253.aspx](https://www.albertahealthservices.ca/info/Page13253.aspx)



## Waxbarashada

### Waxbarashada dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare

Waxbarashada dawlada ee carruurta jira shan ilaa 19 sano waa bilaash. Gudaha Alberta, carruurta jira da'aha lix iyo 16 waa inay dugsii dhigtaan. Waalidka ayaa dooran kara inay ilmahooda geeyaan dugsiga barbaarinta. Nidaamka waxbarashada ayaa loo qaybiyaa 12 fasal.

### Jaamacada iyo waxbarashada dadka waawayn

Dadka waawayn ee da' kasta ayaa dhigta barnaamijyada jaamacadaha si ay u helaan shahaadooyin, kor ugu qaadaan aqoontooda ayna u bartaan xirfado cusub.

Waxbarashada Sare ee Alberta ayaa bixisa xog, khayraad iyo taageero haddii aad doonayso inaad hesho waxbarasho ama tababar dheeraad ah.

Waxaad ka dooran kartaa machadyo iyo barnaamijyada dugsiga sare kadib oo kaladuwan:

- Jaamacadaha ayaa baxsha barnaamijyada shahaadooyinka koobaad ee jaamacadaha iyo shahaadooyinka labaad iyo sadexaad ee jaamacada.
- Kuleejyada dawlada ayaa baxsha shahaado, diblooma, kobcin waxbarasho, wareejinta jaamacada, tababarka shaqada, sii wadista waxbarashada iyo barnaamijyada shahaadada xirfada.
- Kuleejyada gaarka loo leeyahay ayaa baxsha shahaado, diblooma, kobcin waxbarasho, wareejinta jaamacada, sii wadista waxbarashada iyo barnaamijyada shahaadada jaamacada qaarkood. Kuleejyada gaarka loo leeyahay waxay mararka qaar la xariiraan urur diimeed.
- Macaahida farsamada ayaa baxsha shahaado, diblooma, shahaado xirfadeed, tababar shaqo iyo barnaamijyada sii wadista waxbarashada. Inta badan koorsooyinka ayaa la xariira xirfadaha ama shaqada farsamada.
- Dugsiyada tababarka xirfada ee gaarka loo leeyahay ayaa baxsha tababarka shaqooyin gaar ah sida iibiye, cabitaan gade, farsamo yaqaanka naqshada ama shaqada kumbuyuutarka lagu qabto.
- Barnaamijyada tababarka shaqada ayaa baxsha isku dhafka casharka fasalka iyo tababarka lagu samaynaayo goobta shaqada.

- Waxbarashada dadka waawayn ayaa sidoo kale loo yaqaanaa sii wadista waxbarashada ama waxbarashada sarraysa. Waxay ka kooban tahay casharo ama koorsooyinka dadka waawayn ee doonaaya inay dhamaystaan shahaadada dugsiga sare, kor u qaadaan aqoontooda, bartaan mawduucyo cusub iyo inay helaan xirfado cusub.

### Kor u qaad Aqoontaada Ingiriisiga

Ingiriisku waa luuqada koobaad ee loo adeegsado ganacsiyada, dugsiga iyo nolol maalmeedka Alberta. Xirfadaha sare ee ku hadalka iyo qorista Ingiriisiga ayaa fududaynaaya hanaankaaga dagista iyo helitaanka shaqada.

Goobo badan oo ku yaala Alberta ayaa baxsha tababarka luuqada Ingiriisiga, ayna ku jiraan kuleejyo ama jaamacado, wakaaladaha u shaqeeya soo galootiga, ganacsiyada gaarka ah, iyo ururada diinta iyo kuwa bulshada.

Barnaamijyada luuqada ee ay baxshaan dawlada Canada ama Alberta waa bilaash ama waa kuwo aad uga qiimo jaban kuwa dadka gaarka ah baxshaan.

La hadal dugsigaaga ama Xarunta Taageerooyinka ee Alberta si aad u hubiso inaad u qalanto iyo in kale taageero dhaqaale oo aad iskaga bixiso casharada luuqada. Taageeradaan waxaa ku jiri kara daryeelka ilmaha, gaadiidka, iyo gunnada nololaha. Haddii aad u baahan tahay inaad gasho koorsooyinka shaqada, waxaad u qalmi kartaa dayn aad ka helayso Windmill Microlending.

### Qiimee xirfadahaaga Ingiriisiga

Cabirada Luuqada ee Canada (CLB) ayaa loo adeegsadaa si loo qiimeeyo xirfada luuqada ee Canada. Qof ku jira Cabirka 1 ayaa yaqaana Ingiriisii aad u yar ama aan waxba ka aqoon. Qof ku jira Cabirka 12 ayaa si faseex ah ugu hadli kara Ingiriisiga.

Si guud, waxaad u baahan tahay CBL 4 si aad ula qabsato nololaha maalin kasta. Heerarka CBL 5 ilaa 8 ayaa loo baahan yahay si aad uga shaqayso Alberta. Heerarka CBL 6 ilaa 9 ama ka badan ayaa loo baahan yahay si aad wax uga barato Alberta.

Si aad u ogaato heerkaaga CBL:

- Samee Qiimaynta Luuqada ee Canada ee Iskaa ah (CBL) ee bilaashka ah oo Oonlayn lagu sameeyo. Tan ayaa fikir kaa siinaysa heerkaaga CBL ee hadda.
- Samee qiimaynta rasmiga ah ee CBL adoo tagaaya mid kamid ah Xarumaha Soo socda ee Qiimaynta Luuqada iyo soo Gudbinta.

Haddii aad doonayso inaad kor u qaado xirfadahaaga luuqada Ingiriisiga, waxaa jira dookhyo badan, oo ay bixiso Dawlada Canada iyo ururo badan. Arag lifaaqyada kooban ee ku qoran salka hoose ee qaybtaan si aad u hesho dookhyo dheeri ah.



### Xanaanada caruurta

Ma jiro sharci Alberta oo gaar u ah heerka da'da ilmaha ee kaligood laga tagi karo. Waa inaad adeegsato fikirkaaga saliiimka ah aadna tixgeliso da'da iyo qaangaarnimada ilmahaaga. Inta badan dadka Alberta ayaa dhiiba qarashka daryeelka ilmaha ee carruurtooda kayar 12 sano. Dookhyada daryeelka waxaa kamid ah:

- xarumaha daryeelka maalintii ee ruqsada leh oo masuul ka ah ilaalinta ubadka ka yar 7 sano
- guryaha qoyska ee maalintii ayaa baxsha waalidiin leh ruqsad oo ku baxsha adeegyada daryeelka ilmaha guriga
- barnaamijyada daryeelka ee ka baxsan dugsiga ayaa baxsha daryeelka ilmaha gaaray da'da dugsiga sacadaha ay ka maqan yihiin dugsiga
- barnaamijyada barbaarinta ama xanaanada ubadka ayaa ku dhiiri gasha ilmaha jira 2 sano ilaa 5 sano inay wax bartaan, ciyaaraan ayna kobac sameeyaan

Haddii aadan awoodin inaad bixiso qarashka daryeelka ilmaha, waxaad u qalmi kartaa taageerada dhaqaalaha daryeelka ilmaha ee dawlada.



### Ilmaha qaba baahiyaha gaarka ah

Haddii cunugaagu qabo baahiyaha gaarka ah, sida daryeel caafimaad oo joogto ah, naafo ama dib u dhaca koriinka, caawimaad ayaad ka heli kartaa Adeegyada Carruurta ama Barnaamijka Taageerada Qoyska ee Carruurta Naafada ah (FSCD).

### Lifaaqyo Kooban iyo Xogta lagala Xariiraayo

Taageerada Dhaqaalaha daryeelka carruurta ee dawlada

<https://www.alberta.ca/child-care-subsidy.aspx>

Adeegyada Carruurta

<https://www.alberta.ca/childrens-services-office-locations.aspx>

Barnaamijka Taageerada Qoyska Carruurta Naafada ah (FSCD)

<https://www.alberta.ca/fscd.aspx>

## Lifaaqyo kooban

Waxbarashada Sare ee Alberta  
[alberta.ca/advanced-education.aspx](http://alberta.ca/advanced-education.aspx)

Qorshee waxbarashadaada - shahaadooyinka iyo barnaamijyada  
<http://study.alberta.ca/plan-your-studies/credentials-programs/>

Qiimaynta Iskaa ah ee  
[clb-osa.ca/home](http://clb-osa.ca/home)

Xarunta Qiimaynta Luuqada, Soo Gudbinta iyo Talo bixinta Waqooyiga Alberta  
[larcc.cssalberta.ca/](http://larcc.cssalberta.ca/)

Koonfurta Alberta  
[settlementcalgary.com/clarc-registration/](http://settlementcalgary.com/clarc-registration/)

Kaalmada daryeelka carruurta  
[alberta.ca/child-care-subsidy.aspx](http://alberta.ca/child-care-subsidy.aspx)

Adeegyada Carruurta  
[alberta.ca/childrens-services-office-locations.aspx](http://alberta.ca/childrens-services-office-locations.aspx)

Barnaamijka FSCD  
[alberta.ca/fscd.aspx](http://alberta.ca/fscd.aspx)

Women's Hub  
<https://www.alberta.ca/womens-hub.aspx>

Taleefanka Laynka Xogta Rabshada Qoyska 310-1818

Hooyga Xaaladaha degdega ah  
<https://www.alberta.ca/find-shelters.aspx>

Adeegyada imaatinka kahor  
<https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/new-immigrants/new-life-canada/pre-arrival-services.html>

Ururka Alberta ee Wakaaladaha U adeega Soo Galootiga  
[aaisa.ca/membership-directory/](http://aaisa.ca/membership-directory/)

Adeegga Alberta - heshiisyada Kirada  
[alberta.ca/rental-agreements.aspx](http://alberta.ca/rental-agreements.aspx)

Xog badan ka ogoow iibsashada guri | Shirkada Daynta Guryaha iyo Guriyaynta ee Canada (CMHC)  
<https://www.cmhc-schl.gc.ca/en>

Xogta gaadiidka Edmonton  
[edmonton.ca/edmonton-transit-system-ets.aspx](http://edmonton.ca/edmonton-transit-system-ets.aspx)

Xogta gaadiidka Calgary  
<https://www.calgarytransit.com/home.html>

Hel ruqsada darawalka  
[alberta.ca/get-drivers-licence.aspx](http://alberta.ca/get-drivers-licence.aspx)

libso ama kirayso gaari  
[alberta.ca/buying-selling-vehicle.aspx](http://alberta.ca/buying-selling-vehicle.aspx)

Caymis geli gaari  
[airb.alberta.ca/drivers/getting\\_insurance.aspx](http://airb.alberta.ca/drivers/getting_insurance.aspx)

Qaado taargada gaariga  
[alberta.ca/licence-plates.aspx](http://alberta.ca/licence-plates.aspx)

Hel dhakhtar  
[albertahealthservices.ca/info/Page13253.aspx](http://albertahealthservices.ca/info/Page13253.aspx)

Adeegyada bilaashka ah ee caafimaadka dhimirka s  
<http://www.albertahealthservices.ca/amh/amh.aspx>

## Fursada lagu cabiray tirada



Alberta waxay leedahay 455 beeraha qaran iyo kuwa gobalka iyo meelaha la ilaaliyo oo leh buuro qurux badan, meelaha dagaandaga ah, kaydo jiq ah iyo dhul wayn oo cagaar ah.



Waxaan bixinay 6,250 shahaadooyinka xulashada ah oo aan siinay soo galooti anagoo u marayna Barnaamijka Ka Faa'iidaysiga Soo Galootiga ee Alberta sanadkii 2020, anagoo ka caawinay si rasmi ah u dagaan Alberta.



Alberta ayaa leh 26 jaamacadood iyo kuleej oo ay in ka badan 27,000 oo arday caalami ah ka heleen waxbarashada jaamacada oo tayo sare leh sanad dugsiyeedka 2020-2021.



Qoysaska Alberta ayaa hela dakhliga celceliska oo dhan \$104,000 canshuurta kadib. Tan ayaa ka badan celceliska Canada u degsan oo ah \$92,800.



Sanadkii 2020, 6,670 shaqaale caalami ah ayaa yimid Alberta ayagoo soo maray Barnaamijka Shaqaalaha Shisheeye ee Ku meel gaarka ah ee Canada.



iimaha canshuurta ganacsiga ee Alberta waa 8 boqolkiiba – oo ah qiimaha ugu hooseeya Canada oo dhan kana mid ah kuwa ugu hooseeya Waqooyiga Ameerika oo dhan.



Waxaan maal gelinaynaa \$20.7 bilyan si aan u dhisno boqolaal mashruuc aana u abuurno 90,000 oo shaqooyin toos ah iyo kuwo dadban ba sadexda sano ee soo socota.